



Xafiiska Wasiirka

Tixraac: DWBS/WM/XW/192/2026

Taariikh: 14 October 2026

Ku: Golaha Wasiirrada Dawladda Waqooyi Bari ee Soomaaliya

Laascaanod

Og: Madaxweynaha Dawladda Waqooyi Bari ee Soomaaliya

Laascaanod

Ujeedo: Gudbintan Qabyo-Qoraalka Miisaaniyadda Sannad-Maaliyadeedka 2027

Mudane Madaxweyne iyo Mudanayaal Golaha Wasiirrada:

Wasaaradda Maaliyaddu, iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda shaqo ah iyo masuuliyadda ka saaran diyaarinta, isku-dubbaridka iyo Miisaaniyadda Dawladda, waxay si rasmi ah Golaha Wasiirrada ugu soo gudbinaysaa Qabyo-qoraalka Miisaaniyadda Sannad-maaliyadeedka 2027, si Golaha Wasiirradu uga yeesho dood, dib-u-eegis iyo ansixin.

Qabyo-qoraalka Miisaaniyadda 2027 waxaa lagu diyaariyey iyadoo lagu salaynayso Istaraatiijiyadda Miisaaniyadda Sannad-maaliyadeedka 2027, saadaasha dhaqaalaha guud, awoodda dakhliga gudaha, filashada taageerada deeq-bixiyeyaasha, baahiyaha hay'adaha Dawladda iyo mudnaansiinta Dawladda Waqooyi Bari ee Soomaaliya.

Miisaaniyaddu waxay mudnaan gaar ah siinaysaa:

1. Iyadoo laga duulayo siyaasadda beekhaaminta dhaqaalaha kooban ee aan heli karno iyo baahiyaha tirada badan ee ku gedaaman hawlaha shaqo ee Dawladda, qodobkani wuxuu diiradda saarayaa mudnaansiinta baahiyaha Dawladda, si loo helo habraac iyo hage lagu shaqeeyo kaas oo si cad u qeexaya sida ay u kala mudan yihiin baahiyaha Dawladdu.
2. Haddii dakhliga guduuhu ka yaraado inta la filayo ama la waayo deeqaha la quuddaraynayo, Wasaaradda Maaliyadduna ay fulin kari waydo bixinta kharashaadka ku jira qoondada Miisaaniyad Sanadeedka 2027, waxaa Wasaaraddu u raacaysaa mudnaanta kharash bixinta sida hoos ku cad, waxayna u kala mudnaan doonaan sidan:
 - a. Kaabayaasha amniga dawladda iyo difaaca muwaadiniinta (saadka, sahayda, mushaharka, gunnada, qalabaynta, daryeelka iyo caafimaadka ciidanka).
 - b. Xuquuqda shaqaalaha rayidka ah iyo shaqaalaha laamaha dakhliga soo saara (mushahar, gunno iyo hawlga).
 - c. Kharashaadka xafiisyada Dawladda (kiro, koronto, biyo iyo adeegyada lagama maarmaanka ah).

- d. Qabsoomidda iyo maalgelinta imtixaanka shahaadiga ah ee heerarka waxbarashada.
- e. Gunnada iyo xuquuqda Golaha Wasiirrada iyo Xildhibaanada.
- f. Qalabaynta iyo casriyeynta xafiisyada Dawladda.
- g. Horumarinta kaabayaasha nolosha (xafiisyo, waddooyin, xarumo caafimaad, waxbarasho).

Wasaaraddu waxay intii lagu jiray diyaarinta miisaaniyadda wadatashiyo iyo dhageysiyo miisaaniyadeed la yeelatay Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Wakaaladaha Dawladda, iyadoo la qiimeeyey qorshayaashooda, baahiyahooda kharash, waxqabadkooda iyo waafaqsanaanta mudnaansiinta guud ee Dawladda.

Sidaas darteed, waxaan Golaha Wasiirrada ka codsanaynaa:

1. Inuu dib-u-eegis iyo dood ka yeesho Qabyo-qoraalka Miisaaniyadda Sannad-maaliyadeedka 2027.
2. Inuu ansixiyo qoondada guud, mudnaansiinta kharashaadka iyo qorshaha dakhliga ee ku jira miisaaniyadda.
3. In Wasaaradda Maaliyadda loo oggolaado inay samayso sixitaannada farsamo ee ka dhasha go'aannada Golaha Wasiirrada;
4. In miisaaniyadda la ansixiyey loo gudbiyo Golaha Wakiillada si looga doodo, looguna ansixiyo si waafaqsan shuruucda Maamulka Maaliyadda Guud.

Waxaan Golaha Wasiirrada ka rajaynaynaa inuu mudnaan siiyo ka doodista iyo ansixinta miisaaniyadda, si loo xaqiijiyo in Miisaaniyadda Sannad-maaliyadeedka 2027 lagu ansixiyo waqtigeeda, hay'adaha Dawladduna u helaan awood qaanuun ay ku fuliyaan qorshayaasha iyo adeegyada loo qorsheeyey sannadka 2027.

Wadashaqayn Wacan.

Cabdiqani Xuseen Xaaji Hiirad

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

Dawladda Waqooyi Bari

